# Repair of Interrupted Aortic Arch (IAA)

Hagaajinta interrupted aortic arch (Dhammeys la'aanta halbowlaha dhiigga qeybiya ama IAA)




**Wadne Caadi ah**



Ogeysiis:


Children's Heart Clinic, P.A., 2530 Chicago Avenue S, Ste 500, Minneapolis, MN 55404
West Metro: 612-813-8800 * East Metro: 651-220-8800 * Toll Free: 1-800-938-0301 * Fax: 612-813-8825
Children's Minnesota, 2525 Chicago Avenue S, Minneapolis, MN 55404
West Metro: 612-813-6000 * East Metro: 651-220-6000


Wakhtigii Qorista Juun 2023

© 2019 The Children's Heart Clinic

**Hagaajinta interrupted aortic arch (Dhammeys la'aanta halbowlaha dhiigga qeybiya ama IAA)**
Repair of Interrupted Aortic Arch (IAA)

Hagaajinta dhammeys la'aanta halbowlaha dhiigga qeybiya (interrupted aortic arch) waxaa laga hagaajiyaa qeybta maqan, si uu u kobco oo uu cabbir sax ah u gaaro. Qalliinkan waa in badanaa la sameeyo toddobaadka ugu horreeya ee nolosha ilmaha.

Furista bartanka shafka (jeexid ah qeybta dhexe ee shafka) ayaa la sameyn doonaa. Bukaanka waxaa lagu xirayaa wadne iyo sambab macmal ah (mashiin ah wadne-sambab). Si qalliinkaas loo sameeyo, tuubbo la yiraahdo Gore-tex®(Gore) ayaa lagu tallaalayaa halbowlaha xabadka (eeg sameynta Blalock-Taussig oo ah marinka qulqulka dhiigga) ama tuubbo ah halbowlaha xabadka oo ah toos. Xididka dheeraadka ah (Patent ductus arteriosus ama PDA) ayaa la isku qodbayaa oo la kala qeybinayaa. Waxaa markaas lagu xirayaa qalabka mashiinka maskaxda. Habka qalliinka ee lagu ilaalinayo maskaxda waa mashiinka dhiigga ku dhex wareejinaya tuubada Gore-tex® (Gore) iyo halbowlaha jirridda ah si loo siiyo dhiig ogsijiin leh madaxa inta lagu jiro sameynta "halbowlaha cusub" ama dibudhiska halbowlaha buundada ah. Mararka qaarkood, xidid dheeraad ah ayaa lagu sameynayaa halbowlaha weyn ee hoos u gaaraya jirka.

Aadista kor, qeybta gudubka, iyo aadista hoose ayaa markaas loo furayaa xididka dhiigga. Waxyaabaha hoos u laallaada ee xididka dhiigga jirka hoose ayaa la soo goynayaa. Darbiga dambe ee halbowlaha hoos u socda ayaa markaas lagu tolayaa dhankiisa dambe ee kore ama ah gudubka, oo waxaa sameysmaya halbowle cusub oo qeybinaya dhigga. Sharootada lagu dhejinayo sambabka (halbowlha sambabka) ayaa laga soo goynayaa in le'eg waxaa lagu tolayaa qeybta hore ee halbowlaha la sameeyey. Marka la dhammeeyo, waxaa halbowlaha dhiigga lagu bilaabayaa mashiin ah wadne-sambabka.

Haddii ay jiraan duleelka qalbaca hoose (ventricular septal defect ama VSD) (eeg Hagaajinta Duleelka Qalbaca hoose) ama duleelka qeybta sare (atrial septal defect ama ASD) (eeg Hagaajinta Cilladda Duleelka Kore) marka la arko, waa la hagaajin doonaa. Marka la dhammeeyo, waxaa ilmaha aayar looga furayaa mashiinka naqaska: Xabadka ayaa u sii furnaan kara. Haddii xabadku furnaanayo, qalliinka ayaa lagu daboolayaa sharooto ah Gore-tex®(Gore) ama Silastic™. Xabadka waxa la isku xirayaa 1 ilaa 3 maalmood gudahood qalliinka ka dib (waa hab la yiraahdo daahinta xiritaanka xabadka).

**Hawlgalka Caadiga ah ee Qalliinka Ka-dib:**

- Wakhtiguu Qaadanayo Qalliinka: 4 ilaa 5 saac
- Qalabka Tuubooyinka: Badanaa ilmaha waxaa lagu soo celinayaa Xarunta Daryeelka Wadnaha ka dib qalliinka oo waxaa lagu xirayaa tuubo ah neefsasho, mid halbowle oo lagula soconayo cadaadiska dhiigga, mid kale oo ah xididdada (oo faleebbe laga qaato ama dhiig laga qaadi karo), faleebbe bannaanka ah, tuubooyinka xabadka foley oo dheecaanka looga daadinayo, iyo xargaha hagaajinta oo meelgaar ah.
- Sookabashada Caadiga ah ee Qalliinka Ka-dib: Waxaa wax caadi ah in ay dhallaanku xoogaa "bararaan" ka dib qalitaanka badan ee adag. Xiritaanka xabadka waxaa la sameynayaa marka ilmuhu u dhow yahay culeyskii qalliinka ee hore iyo xaalka cabitaanka. Tuubada neefsashada waxaa looga saarayaa dhowr maalmood gudahood xiritaanka xabadka. Tuubada halbowlaha badanaaa waa la gooyaa marka la baxiyo tuubada neefsashada oo inta badan daawooyinka faleebbaha waa la joojinayo. Tuubada xididdada bartamaha waxaa laga bixinayaa badanaa marka la joojiyo ee aan loo baahneyn in mar dambe la isticmaalo. Tuubooyinka xabadka waxaa laga saaraa 24 ilaa 48 saac ka dib qalliinka, marka uu yaraado dheecaanka soo baxaya.
- Wakhtiga Joogitaanka Caadiga ah: Celceliska joogitaanka isbitaalka ee ka dib Qalliinka IAA qiyaastii waa 2 ilaa 4 toddobaad. Wakhtiga joogitaanka waxa uu ku xiran tahay ilaa inta dhallaanku baranayo in uu wax cuno. Waxa ay ilmuhu joogaan dhowr toddobaad si ay u bartaan cuntada qalliinka ka dib.

**Qaadashada Daawooyinka Guriga:** Carruurtu waxa ay u baahan karaan hal daawo ama in ka badan in ay guriga u qaataan ka dib Qalliinka IAA sida:

- Daawada biyaha saarta (Lasix) si looga xakameeyo dareeraha
- Wax ah dhimista culeyska wadnaha (Enalapril, Captopril)
- Daawada dhiigga jilcisa (Aspirin, Lovenox) looga daaweeyo xinjirow hadduu jiro


© 2019 The Children's Heart Clinic